

Nolol wanaagsan ma jirto haddii aanay jirin GARASHO FAYOOW

Lacagtu qofna ma daaweyso, laakiin la'aanteeda joogtada ah waxay jirrisaa wax kasta oo ku xeeran. Sababtaas darteed ayuu dhaqaale shaqaynaya u yahay shardiga aasaasiga ah ee daryeelka iyo ammaanka.

HADAFKA XISBIGA ISBAHAYSIGU waa Finland oo dadka jooga ay ladan yihii. Waxaan doonaynaa, in dadku ay si fudud u helaan daaweynta iyo in ilaha dhaqaale ee yar ay ku filnaadaan baahiyaha adeegyada dadka gaboo'baya. Si loo gaaro hadafka, waa in adeegyada sooshalka iyo badbaadada si hufan loo mideeyaa.

WAXAA MUHIIM INOO AH, in dadka isticmaalaya adeegyada sooshalka iyo caafimaadka ay fursad u helaan saamayn ku yeelashada adeegyada. Haddii aan nahay xisbiga isbahaysiga waxaa noogu muhiimsan, in qofku uu adeegga helo marka uu u baahanyahay. Annaga muhiim nooma ahan, in adeegyada uu bixinayo soonaha nololwanaagga, shirkad ama ganacsade ama urur qaabilsan adeegyada caafimaadka iyo sooshalka (sote).

ADEEGYO SHAQAYNAYA waxay ka dhashaan wadashaqeynta shaqaale aqoon leh oo nololwanaagsan. Sidaas darteed ayeey muhiim u tahay, in soonayaasha nololwanaaggu ay xoogga saaraan caafimaadqabka shaqada. Tusaale ahaan, waxaa suuragal in hoggaamin wanaagsan iyo habab waxqabad ee cusub lagu hagaajiyo nololwanaagga shaqaalahaa iyo tayada adeegyada.

CODKA LA SIIYO XISBIGA ISBAHAYSIGU ee doorashooyinkan waa cod la siiyay maamul dhaqaale oo mas'uul ah. Ma doonayno, in dhaqaalahaa soonayaasha nololwanaagga oo si xun loo maamulay dartiis ay adeegyada Finnishku u dhibaatoodaan, culayska canshuurtu uu kordho ama deyn gelidda dowladdu ay sii xoogaysato. Xisbiga isbahaysigu wuxuu maya leeyahay canshuurta gobolka, sababtoo ah waa khasab in ay keenleysaa in canshuuridda shaqada

Finnishku ay sii adkaato.

HADDII AANAN HAYSAN DHAQQAALE WAARA OO ADKAYSI

LEH ma aanu haysan lahayn kabadhka ilmaha dhiciska ah la geliyo ee ugu cusub, daaweynta kansarka ee dunida ugu fiican ama daryeelka ilkaha ee lacagta la'aanta ah ee la siiyo cunug iyo da'yar kasta. Marka uu dhaqqaale fiicanyahay dadkuna ay shaqo haystaan, lacagtu waxay ku filnaanaysaa sidoo kale adeegyada dhammaanteed muhiimka u ah.